



HAKUNILA-DEENNA IYO MARTSARI-GEENNA

Fikrad ka dhiibo, codee oo saameyn ku yeelo.

Sidee baad jeclaan laheyd in loo isticmaalo lacagta loogu talaggalay horumarinta degaanka nagu hareereysan? Hakunila iyo Martinlaakso waxaa loo hayaa lacag gaareysa 50 000 yuuro oo loogu talaggalay in dadka xaafadahaas deggan ay fikradooda uga dhiibtaan sidii laga yeeli lahaa. Ujeedada lacagtaas loogu talaggalayna waa, in dadaka xaafadda deggan ay ka qaybqaataan fikrad ka dhiibashada iyo u codeynta ku saabsan, halka loo isticmaalaayo miisaaniyadda ay magaaladu goobahaas ugu talagashay.

Sidee baad uga qeyb qaadan kartaa?

Noo sheeg fikraddaada. Fikrad ka dhiibashadu waxaa ay socon doontaa 18.8.-14.9.2020. Qof walba ayaa fikrad ka dhiiban kara, si gooni ah ama si wadajir ah. Fikradda waxaad ku dhiiban kartaa luqadaha finishka, iswidishka iyo ingiriiska.

Fikradda waxaa lagu soo gudbin karaa dhanka bogga internetka osallistu.vantaa.fi. Ama waxaad si toos ah u tagi kartaan goobaha ku yaalla xaafadaha Hakunila iyo Maartinlaakso, tusaale ahaan maktabadaha, goobaha fikrad dhiibashada, halkaasoo fikradda si qoraal ahaan lagu dhiiban karo. Intaas waxaa dheer in aan qabanqaabin doonno nidaamka fikrad dhiibashada ee loo bixiyay pop up, halkaasoo xeeldheerayaasha magaaladu ay kaa caawin doonaan fikrad dhiibashada. Waxaad arrinka fikrad dhiibashada ka eegtaa bogga internetka: osallistu.vantaa.fi.

Fikrad nooc ee ah ayaa loo baahan yahay?

Fikradaha la soo jeedinaayo waa in ay noqdaan kuwo ku wajahan xaafadaha magaaloyinka Hakunila iyo Martinlaakso ee qeybaha bannaanada magaalada, sida waddooyinka, beeraha nasashada, goobaha isboortiga iyo ardaaga iskuullada iyo xannaanooyinka. Fikraduhu waa in ay noqdaan kuwo la xiriira horumarinta degaanka nagu hareereysan, waana in ay noqdaan kuwo la xiriira mid ka mid ah mawaadiicda soo socota: ka helitaanka, wadajirka bulshada, si sahal u helitaanka, nololwanaagga iyo ammaanka.

Maxaa lagu heli karaa 50 000 ka oo yuuro?

Tusaale ahaan beeraha nasashada ee la fariisto, caagga qashinka oo la dhigo ardaaga iskuullada ama sanduuqa ubaxa ama fiyooraaha ee meelaha furan ee bannaanka la dhigo, kuwaasoo qiimahoodu dhan yahay 500-1000 yuuro. Soo iibsashada ama rakibitaanka hal qalabka isboortiga ka mid ah wuxuu noqonayaa qiyaastii 7000 euroa. In beerta eeyaha ama beerta nasashada oo gabi ahaanba dib loo dhiso waxaa ku baxaysa lacag aad u fara badan. Sidoo kale qalabka waaweyn ee ciyaarta, sida kan lagu soo taraaraxo, waxaa ku baxaaya lacag aad u fara badan.

Maxaa dhacaaya fikrad dhiibashada kaddib?

Xeeldheerayaasha magaalada ayaa eegi doona fikradaha la soo dhiibtay, waxaana ay qiimeyn ku sameyn doonaan inta uu dhan yahay kharashka ku baxaaya. Arrimaha ku saabsan kala saarista codeynta iyo dhanka codeyntu u badato waxaa nagala shaqeyn doona dadweynaha. Inta u dhexeysa 20.10.-16.11.2020 dhammaanba carruurta da'doodu gaartay 12 ka sano ee deggan xaafadaha Hakunila iyo Martinlaakso waxaa ay codkooda ka dhiiban karaan, wax kasta oo lagu hirgalin karo fikradaha la soo jeediyay ee 50 000 yuuro. Codenytu waxaa ay ka dhici doontaa bogga osallistu.vantaa.fi. Talooyinka la soo jeediyay ee dhanka codeynta ku guuleysta waxaa la hirgalin doonaa sannadka 2021-da.